MINNESOTA
OFFICE OF OMBUDSMAN
FOR MENTAL HEALTH AND
DEVELOPMENTAL DISABILITIES

121 7th Place East, Suite 420, Metro Square Building
Saint Paul, Minnesota 55101

Cod: 651-757-1800
Khadka Bilaashka ah: 800-657-3506
Fakis: 651-797-1950
TTY/Cod: Adeega Minnesota Relay Service 711
https://mn.gov/omhdd

"Cod Siinta Kuwa Marar Dhif ah uun La Maqlo"

Ku Xukminta Daawaynta Madaniga Ah Ee Loogu Talagalay Dambiilayaasha Galmada Minn. Stat. § 253D

Xaashidan xaqiiqdu waxay sharraxaysaa nidaamka xukminta daawaynta madaniga ah sida uu qabo Sharciga Xukminta Daawaynta iyo Daawaynta ee Minnesota ee loogu talagalay dadka si madani ah loogu xukmiyey daawaynta sababtoo ah dembiyada galmada. Shakhsiyaadka lagu xukumay dembiyada galmada dhammaantood si madani ah looguma xukmiyo daawaynta oo loogu talagalay daawaynta dembiilaha galmada. Shakhsiyaadka ay ku hesho inay qabaan "shakhsiyada jirrada galmo" ama "qof halis ah galmo ahaan" maxkamadu ayaa lagu xukmiyaa daawaynta Barnaamijka Dembiilaha Galmada ee Minnesota (MSOP). Wakiilka Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota ayaa howlgeliya MSOP.

Xaashidan xaqiiqdu waxay sharraxaysaa cidda hoos imanaysa xukminta daawaynta madaniga ah ee dembiile galmo iyo heerarka kala duwan ee hannaanka xukminta daawaynta. Waxay sidoo kale bixisaa sharraxaad ku saabsan barnaamijka daawaynta dambiilaha galmada ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee loogu talagalay shakhsiyaadka lagu xukmiyey daawaynta in ay yihiin dambiilayaasha galmada.

Shakhsiyaadka qaba shakhsiyada jirrada galmo iyo Qofka Galmo ahaan Halista ah

Gobolka Minnesota wuxuu adeegsadaa xukminta daawaynta madaniga ah si loogu daaweeyo dembiilayaasha galmada qaarkood goobaha daaweynta ee aadka loo ilaaliyo. Laba qayb-hoosaad oo ka mid ah Sharciga Xukminta Daawaynta iyo Daawaynta ee Minnesota ayaa loo isticmaalaa in lagu xukimiyo dembiilayaasha galmada si loo daaweeyo; qodobka shakhsiga qaba shakhsiyada jirrada galmo, Xeerka Minnesota 253D.02, sub. 15 iyo qodobka ku Shakhsiga Galmo ahaan Halis ah, Xeerka Minnesota 253D.02, sub. 16. Qofka waxaa loo xukmin karaa daawaynta iyadoo la raacayo labada qaybhoosaadba.

In kasta oo labada qaybinoodba ay u kala duwan yihiin siyaabo muhiim ah, haddana labadooduba waxay u adeegaan ujeedo isku mid ah. Sharciga Xukminta Daawaynta iyo Daawaynta ee Minnesota waa sharci madani ah oo loo isticmaalo in lagu meeleeyo qofka daawaynta dembiilaha galmada si loo yareeyo halista mustaqbalka ee habdhaqa galmo halis ah. Looma isticmaalo in loogu ciqaabo qofka fal dambiyeedka galmo ee uu horay u gaystay. Dembiilayaasha galmada waxaa lagu xukmiyaa daawayn wakhti aan la cayimin ah, taas oo macnaheedu yahay in laga yaabo in la hayo muddo kasta oo ay qaadato inay ku guuleystaan daawaynta oo ay qanciyaan welwelka amniga bulshada.

Maxkamada madaniga ah ayaa qofka u xukmin karta daawaynta dembiilaha galmo haddii garsooruhu uu go'aamiyo in shaqsigu yahay qof qaba "shakhsiyada jirrada galmo," "qof galmo ahaan halis ah," ama labadaba. Shakhsiyada jirrada galmo waa qof, sababta oo ah xaalad dhimirka darteed:

1. ku hawlan hab dhaqan xumo ah oo ku saabsan arrimaha galmada;
2. qof aan lahayn awood buuxda oo uu ku xakameeyo dareenkiisa galmo; iyo
3. taas natiijadeeda ee ah in uuna qofku awoodin in uu xakameeyo dhaqankiisa khatar ku ah dadka kale.

Qofka sidoo kale waxaa laga yaabaa in lagu xukmiyo daawaynta dembiilaha galmada inkasta oo dabeecada shakhsigu aysan gaarin heer loo tixgeliyo in uu qabo shakhsiyada jirrada galmo. Qofka waxaa loogu xukmin karaa daawaynta inuu yahay qof khatar ugu jira in uu galmo gaysto. Si ka duwan qodobka shakhsiyada jirrada galmo, garsooruhu uma baahna inuu muujiyo in qofku leeyahay "awood la'aanta xakamaynta dareenka galmada ee qofka." Qof galmo ahaan halis ah waxaa lagu qeexaa inuu yahay qof:

1) in uu ku hawlanaa habdhaqan anshax galmo waxyeelo leh oo abuuraysa suuragalnimada waxyeello daran oo jireed ama shucuureed oo loo gaysto qof kale;
2) qofku wuxuu leeyahay galmo ahaan, shakhsiyad ama cillad kale oo maskaxeed ama naafonimo; iyo
3) qofku waxay u badan tahay inuu mustaqbalka ku kaco falal anshax xumo galmo ah.

Nidaamka Xukminta Daawaynta

1) Nidaamka Dhagaysiga Xukminta daawaynta kahor

Macluumaadka ku saabsan qofka, sida taariikhda qofka maskaxdiisa iyo taariikhdiisa dambiilenimo, ayaa waxaa soo ururinaya qareenka degmada oo laga yaabo in uu diyaariyo xukminta daawaynta. Qareenka degmadu wuu codsan karaa, laakiin loogama baahna inuu helo, warbixinta baaritaanka codsiga kahor oo ay diyaariyeen adeegyada aadanaha ee degmada si loo go'aamiyo in shuruudihii xukminta daawaynta la buuxiyey.

Badanaa, codsiga xukminta daawaynta waxaa la xareeya waxyar ka hor xilliga qofka loo qorsheeyey in laga siidaayo xabsiga, ka dib marka uu dhammeeyo muddada xabsiga ee loo baahanyahay. Si kastaba ha noqotee, codsi ayaa la xarayn karaa kahor intaan qofka lagu xukumin xabsi sida, tusaale ahaan, marka qofku ogolaado in loo xukmiyo daawayn iyada oo shuruud u ah gorgortanka qirashada. Ugu dambeyntii, codsi ayaa sidoo kale la xarayn karaa kadib marka qofka lagu sii daayo shuruudo ama siidayn la kormeerayo ama marka qofku uu dhammaystiro dhammaan shuruudaha xukunka ciqaabta, in kasta oo uusan qofku gelin dambiyo cusub oo galmo ah.

Dhageysiga Xukminta Daawaynta

Dhagaysiga xukminta daawaynta waxaa loo qabtaa si la mid ah dhagaysiga xukminta daawaynta dembiile aan gelin dambi galmo. Faahfaahinta dhagaysiga, ka eeg Qodobka 4, Dhagaysiga Xukmintaada Daawaynta, Xaashida Xaqiiqda ee Nidaamka Xukminta Daawaynta Madaniga ah. Xaashidan xaqiiqda ayaa waxay sharraxaysaa xuquuqdaada marka la joogo dhagaysiga. Sidoo kale eeg dukumiintiga, Ogaysiiska Xukminta Daawaynta Madaniga ah ee Dadka Xanuunada Dhimirka Qaba ee Halista ah

Marka la xareeyo codsiga, maxkamada madaniga ah ayaa waxay qaban doontaa dhagaysi waxayna dhagaysan doontaa caddaymaha taageeraya xukminta daawaynta. Wixii caddayn ah ee la xiriirta taariikhda dhaqan xumada galmada ee qofka ama falalka rabshadaha waa la dhagaysan karaa, iyadoo la raacayo xeerarka caddaynta. Shakhsigu wuxuu xaq u leeyahay qareen wuxuuna soo bandhigi karaa isdifaacid, oo ay ku jiraan su'aalo waydiinta markhaatiyaasha, iyo sidoo kale soo bandhigida caddaymo iyo markhaatiyaal isagoo matalaya qofka lagu xukminayo daawaynta.

Garsooruhu wuxuu tixgelin karaa caddaynta eedeymihii hore ee dhaqan xumada galmada, xitaa haddii qofka aan weligii la xirin ama lagu soo oogin dambiga. In kasta oo gobolku haysto culayska in uu caddaynta keeno si loo muujiyo in xukminta daawayntu tahay mid lagama maarmaan ah, waxaa muhiim ah in la ogaado in culayska keenista caddayntu uu ka hooseeyo ka loo adeegsado in qof lagu xukumo dambi. Sidaa darteed, garsooraha ayaa wuxuu tixgelin karaa caddaynta anshax xumo galmo xitaa mararka qofka aan lagu helin dambi.

Wakhtigan la joogo, qofka ay u socoto dacwad xukminta daawayntu xaq uma laha xukunka faciisu go'aamiyaan (jury trial). Natiija ahaan, dhammaan kiisaska xukminta daawaynta waxaa go'aamiya garsoore.

Haddii codsi loo xareeyay xukminta daawaynta shaqsigu in uu qabo shakhsiyada jirrada galmo ama qof galmo ahaan halis ah oo qofka la geliyey hayn maxkamadeed inta laga gaarayo dhagaysiga xukminta daawaynta ee ugu dambeeya, qofkaas waxaa lagu xiri karaa Waaxda Asluubta ama xarunta xabsiga ama haynta ee degmada. Qofka waxaa laga yaabaa inuu ku xirnaado goobtaas oo kale, halkii uu kaga xirnaan lahaa xarun daaweyn oo ammaan ah, illaa inta laga helayo go'aaminta codsiga xukminta daawaynta.

Haddii maxkamadu ku hesho caddayn cad oo lagu qanci karo in shaqsigu qabo shakhsiyada jirrada galmo (sexual psychopathic) ama uu yahay qof gaysan kara khatar galmo, waa inay ku xukmiso qofka ku daawaynta goob caafimaad oo ammaan ah oo ay maamusho MSOP. Haddii qofku muujiyo in meel ka xannibaad yar la heli karo, oo buuxin karta baahiyaha daawaynta ee qofka, oo buuxin karta shuruudaha amniga dadwaynaha, maxkamadu waxaa laga yaabaa inay qofka ku xukmiso ku daawaynta goob xanibaad yar. Xukminta Daawaynta waxaa laga yaabaa in racfaan looga qaato Maxkamada Racfaanka iyo Maxkamada Sare ee Minnesota. Inta lagu jiro wakhtigan, qofku wuxuu ku xiran yahay xarunta uu hadda ku xukman yahay inta racfaanka laga sugayo.

Barnaamijka Dembiilayaasha Galmada ee Minnesota

MSOP waa hal barnaamij oo leh laba xarumood, Moose Lake iyo St. Peter. Goob kasta waxay ku takhasustay qaybaha kala duwan ee habka daawaynta dembiilaha galmada. Dhamaan macaamiishu waxay ku bilaabaan daawaynta xarunta MSOP ee Moose Lake waxaana loo wareejin karaa xarunta St. Peter si loo dhamaystiro daawaynta oo ay u bilaabaan ka shaqaynta siidaynta ku meel gaarka ah. Marka lagu daro qaybaha dib ugu dhaqancelinta, St. Peter waxay sidoo kale siisaa daawayn beddelaad ah macaamiisha uuna barnaamijka caadiga ahi ku habboonayn sababo la xiriira xaddidnaanta garaadka.

MSOP waxay siisaa daawayn cayiman dambiilaha galmada si loo daboolo baahida dadka lasoo gudbiyay oo dhan. Barnaamijka daawayntu wuxuu soo qaadanayaa dhowr nooc oo daawayn casri ah, oo daawayntana waxaa hagaya qorshe daawayn shaqsiyeed oo qeexaya hiigsiga yoolal la cabbiri karo inta lagu jiro daawaynta MSOP. Waxaa jira saddex waji oo ay leedahay habka daawayntu. Macaamiisha MSOP ee doorta inay ka qaybqaataan daawaynta ayaa waxay ka qaybqaataan qiimaynta dembiilaha galmada taas oo aasaas u ah qorshayaasha daawaynta shaqsiyeed. Macaamiisha waxaa lagu meeleeyaa barnaamij iyadoo lagu salaynayo baahidooda caafimaad iyo xaaladaha halista.

Nidaamyada ka Siidaynta Xukunka Daawaynta

Guddi dib u eegis gaar ah ayaa dhagaysta oo tixgeliya dhammaan codsiyada gudbinta, siidaynta ku meelgaarka ah, ka noqoshada siidaynta ku meelgaarka ah, ama ka saaritaan buuxa ee xukminta daawaynta. Codsiga dhagaysiga Guddiga Dib u eegista Gaarka ah waxaa soo gudbin kara shakhsiyaadka lagu xukmiyey daawaynta, qareenka shaqsiga, ama agaasimaha caafimaadka xarunta. Dhagaysiga kadib, Guddiga Dib u Eegista Gaarka ah ayaa waxay talo u soo jeediyaan Gudiga Rafcaanka Garsoorka. Go'aanada ka soo baxa Gudiga Rafcaanka Garsoorka ayaa rafcaan looga qaadan karaa Maxkamada Rafcaanka iyo Maxkamada Sare ee Minnesota.

Halbeegga lagu buuxinayo siidayn buuxda ee qofka lagu xukmiyey daawaynta waa:

1) Awood in uu u leeyahay samaynta la qabsiga bulshada oo la aqbali karo.
2) Khatar in uusan mardambe ku ahayn dadweynaha, iyo
3) Mar dambe in uusan u baahnayn daawayn iyo kormeer.

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada. Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, la xiriir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 121 7th Place E., Suite 420 Metro Square Bldg, St. Paul, Minnesota 55101, https://mn.gov/omhdd/ Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.